

# Nasteexooyinka Xisaabta si loo caawiyo ilmahaaga

Sannadka 3aad – 6aad

Ilmo kasta  
ha helo  
fursad  
kasta



# La sahaminta xisaabta ilmahaaga

Qoysasku waa samaynta kowaad oo ugu badan xagga koritaanka ilmaha. Waxaad samayn kartaa isbaddel adigoo taageera wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga iyo ku caawintooda inay guriga wax ku bartaan.

Waxaad u malayn kartaa in xisaabta uu ilmahaagu dugsiga ku barto inay ka duwan tahay sidii wax laguu soo baray, si kastaba ha ahaatee, waxaad weli siyaabo badan u taageeri kartaa ilmahaaga.

Buug-yarahan wuxuu bixinayaa fikrado aad ilmahaaga kula sahmin karto xisaabta oo uu ku baranayo asagoo cayaaraya iyo nashaadyada qoyska ee maalin kasta.

Waxtar weyn bay u noqon kartaa inaad ilmahaaga ka qaybgeliso nashaadyadan oo kale luqaddooda kowaad, iyo Ingiriisiga haddii aad ku hadli karto.

## Macalinka Ilmahaaga

Macalinka ilmahaagu wuxuu talooyin kaa siin karaa sidaad u caawin lahayd xirfadaha xisaabta ee ilmahaaga. Mowduucyada qaarkood waxaad kala hadli kartaa macalinka kuwaas oo ay ka midka yihiin:

- Heerka wax-qabadka ilmahaaga ee howlaha xisaabta.
- Hadafyada uu ilmahaagu u shaqaynayo inuu ka gaaro xagga xisaabta, iyo sida aad u taageeri karto ilmahaaga inuu arimahaas gaaro.
- Xeeladaha aad isticmaali karto si aad ilmahaaga u caawiso xagga meelaha ku adag asaga ama ayada.

## Qalabyada Intarneedka

Website-ka cusub new *Connect-Primary* ee Dowladda Victoria ayaa sahla si aad ula xiriirto qalabyada wax-barasho ee kombiyuutarkaaga guriga, kombiyuutarka maktabadda degaanka, ama dugsigaaga.

Ka eeg Website-ka *Connect-Primary* website oo ah: <http://www.education.vic.gov.au/primary>

Website-ka *Connect-Primary* waxaa hubiyey macalimiinta si loo hubiyo inuu ku habboon yahay inay isticmaali karaan carruurta.

Xusuuso, hadda aad gasho website-yada kale aan ku qornayn Website-ka *Connect-Primary*, xagga ammaanka darteed, waa inaad intarneedka ku siin faahfaahinta shaqsiyada, sida magacaaga ama magaca ilmahaaga oo dhammaystiran, dugsiga, lambarka taleefanka ama cinwaanka cid kasta oo aadan garanayn.

*Ultranet* waa nadaam intarneed ah oo cusub kaas oo ku siin kara macluumaadka ku saabsan wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga. Waa website dowlad-goboleedka oo dhan ah, ammaan ah kaas oo ardayda oo dhan, waalidiinta iyo macalimiintuba ay ka heli karaan intarneedka. Ka eeg website-ka *Ultranet* oo ah: [www.education.vic.gov.au/about/directions/ultranet/benefits/parents.htm](http://www.education.vic.gov.au/about/directions/ultranet/benefits/parents.htm)

## Cunto sameynta

- Ururi oo akhri cunta sameynta kalana hadal isticmaalka jajibka iyo cabiraada. Dhiirigeli ilmahaaga si uu u sameeyo cabiraad sax ah isagoo isticmaalaya koobab iyo qaadooyin.



- Kala hadal sidii aad ku labalaabi lahayd cunto sameynta. Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu diiwaangeliyo cabiraada cusub ee cunto sameynta.
- Ogow heerkulka iyo wakhtiga karinta ee ku taal habka cunto sameynta.
- Qiyaas kharashka aad ku soo iibsaneyso dhammaan waxyaalaha aad u baahan tahay si aad u sameeyo cunto.

## Warqeysyada

- Bogga hore, qiyaas boqolkiiba inta sawirka iyo qoraalka ah. Kani ma ka duwan yahay afarta bog ee ugu horeeya.
- Baaritaan ku samee kharashka ereygiiba/laynkiiba si aad ugu qorto xayeysiin wargeyska. Xisaabi intay kugu kici doonto si aad ugu qorto xayeysiin qaybta xayeysiinta kala soocan.
- Ka raadi lambarada wargeyska, lambar ahaan iyo erayo ahaan. Jar lambarada iskuna hagaaji adoo ka bilaabaya lambarka ugu yar ilaa ka ugu badan.
- Booqo qaybta xayeysiisa madadaalada. Xulo dhacdo ama filim. Soo saar inta tigidhadu yihiin. Intee bay ugu kacaysaa qoyskaagu inuu tago.
- Iskuday lambarada xujooyinka ah sida Sudoku, qaybta xujooyinka ee wargayska.



## Dhibcaha ciyaaraha

- Sidee baa ciyaarta aad ugu jeceshahay u qortaa dhibcaha? Xisaab nooc ee ah ayaa lagu muujiyaa dhibcaha?
- Sidee baa ciyaaraha kale u xisaabiyaan dhibcaha, tusaale, tennis ka, golf, cricket, kubada koleyga, football ka?
- Sidee baad u xisaabisaa dhibcaha?
- Miyey jiraan siyaalo kale oo loo xisaabiyo dhibcaha?

- Ilaa intee bay socdaan ciyaaraha aad ugu jeceshahay daqiiqo iyo ilmibirigsi ahaan? Miyey u qaybsan yihiin kala badh, rubuc saac ama wax kale?

- Waa maxay qaababka kala duwan ee garoomada lagu ciyaaro iyo barxadaha? Ka hadal geesaska iyo xaglaha.



## Khariidadaha hawada

Gal website kan: <http://www.bom.gov.au/weather/vic/> ama fiiri khariiradaha hawada ee wargeyska.

- Waa maxay kala duwanaanta u dhaxeysa inta ugu badan iyo inta ugu yar ee heerkulka maalin kasta ?
- Raadi saadaalinta toddoba maalmood ka dib diiwaangeli heerkulka saxda ah ee maalin kasta oo isbarbardhig. Saadaalintu sax miyey ahayd? Waa maxay waxyaalaha ay iskaga midka ahaayeen ama ay ku kala duwanaayeen?
- Isticmaal macluumaadka ku qoran website ka hawada si aad u sahamisid kala duwanaanta hadda ee goobta aad degan tahay iyo meelaha kale. Intee roob ah ayaad heshaa marka loo eego kuwa kale? Miyey jirtaa kala duwanaan ah xagga heerkulka?



## Kataloogyada (buugta alaabta lagu sharxo)

- Ka xulo shan shey catalogue –ga ka dibna xisaabi waxay noqoneyso kharashku haddii ay jiri lahayd boqolkiiba 50 iib ah. Miyey sameynaysaa kala duwanaan haddii aad isku darto alaabta, ka dibna ka jartid boqolkiiba 50 wadarta?
- Waa maxay qiimaha ugu fiican ee alaabta iibka ah ee catalogue? Ma sharxi kartaa sababtaada?
- Waa maxay waxa ugu raqiisan ama ugu qaalisan catalogue-gaaga?
- Isbarbardhig kharashka alaabta bakhaaro kala duwan adoo isticmaalaya catalogues kala duwan. Maxaad heshay?

## Jadwalka safarka

- Ma soo saari kartaa meeshaad ka bilaabaysid jadwalka?
- Waa maxay wakhtiga ugu horeeya ama ugu danbeeya safarka khadkaan? Maxay ku kala duwan yihiin?
- Wakhti intee le'eg ayey qaadataa inaad ku safarto khadkan oo dhan?
- Intee joogsi ayuu leeyahay khadkani?
- Waa maxay kala duwanaanta wakhtiga safarka markaadan sameynaynin joogsiyada oo dhan?
- Waa maxay kharashku? Ma qiimo wanaagsan baa marka la barbardhigo fursadaha kale ee safar?



## Lacag

Ku dhiirigelinta carruurta inay ka fekeraan lacag wax ku saabsan, keydinta lacagta iyo tixgelinta siday lacagta u kharashgareeyaan waa xirfado muhiim ah oo ay u baahan yihiin carruurta inay yeeshaan.

- Ku dhiirgeli ilmahaaga inuu soo saaro inta sarif ah ee aad helayso ka dib markaad wax iibsato.
- Kala hadal u keydinta lacagta hadiyad ama wax laga yaabo inuu ilmahaagu jecel yahay inuu iibsado. Soo saar intay qaadaneysa inaad keydiso ilaa intaas haddii ay helaan lacag yar toddobaad kasta.
- Wada xisaabiya intuu taleefanka gacantu joogo bishiiba. Ilaa intee baa lagu kharashgareeyaa fariimaha iyo intee baa ah wecitaanada taleefanka?



## Xoogga saarida Jajabka

Jajabka waa cinwaan xisaab ah oo aad u khuseeya nolol maalmeedka. Waxaan isticmaalnaa aqoonteena jajabka si aan u xalino masalooyinka iyo inaan sameyno go'aamada wkahtiga oo dhan.

Ku taageer ilmahaaga adoo isticmaalaya luuqad xisaabeedka si aad uga hadashid jajabka. Halkan waxaa ah qaar ka mid ah erayada oo ilmahaagu ku isticmaali doono dugsiga:

**Jajab** – waa qayb kasta oo ka mid ah wax dhan, koox ama lambar.

**Koreeye** – lambarka ku tusaya qaybaha lambarka dhan.

$$\rightarrow \frac{1}{5}$$

**Hooseeye** – lambarka qaybaha oo dhan ee loo qaybiyey.

$$\frac{1}{5} \leftarrow$$

**Jajabka toosan** – koreeyaha wuxuu ka yar yahay hooseeyaha.

$$\frac{3}{4}$$

**Jajabka aan toosneyn** – koreeyuhu wuxuu ka weyn yahay ama la mid yahay hooseeyaha.

$$\frac{5}{2}$$

**Jajabka Isu-dhigma** – jajabka leh isku qiimaha ama cadadka.

$$\frac{2}{3} = \frac{4}{6}$$

**Lambarada isku dhafan** – lambar dhan iyo jajab.

$$2\frac{2}{3}$$

**Isla markay carruurtu bartaan jajabka, waxay helaan xirfado cusub oo xisaabeed:**

Carruurtu waxay bilaabaan iyagoo baranaya inay jiraan lambaro badan oo u dhaxeeya lambarada dhan. Laynka lambarka waa qaab wax ku ool ah oo lagu bilaabi karo.

Bilow ahaan, carruurtu waxay awoodaan inay gartaan oo ay sameeyaan qaabab ah jajabka ay yaqaanaan, tusaale  $\frac{1}{2}$  (badh/bar) ama  $\frac{1}{4}$  (rubuc). Tusaalayaasha maalin kasta waxaa ka mid ah wadaagida tufaaxa ama jarida go' rooti ah.

Markay carruurtu bilaabaan inay wax isku daraan, kala jaran iyo isku dhuftaan jajabka waxay isticmaalaan qaabab si ay u caawiyaan.

Carruurtu waxay ku xiriiriyaan fikradaha kale ee xisaabeed jajabka oo ay ka mid yihiin:

- **Tobanley** – hab lambareed ku saleysan toban, tusaale ahaan, 0.75 ama .75
- **Saami** – wuxuu isbarbardhigaa qiimayaasha laba cadad, tusaale,  $\frac{3}{4} = 3:4$
- **Boqoley** – waa lambar boqolkiiba (100) ah, tusaale,  $\frac{3}{4} = 75\%$

Ma iskudayday fikradahaan guriga?

Ugala hadal si wanaagsan u isticmaalka jajabka nolol maalmeedka. U sameynta qaabab jajab ilmahaaga waxay taagereysaa fahamkooda jajabka. Iskuday qaar ka mid ah fekradahan adoo isticmaalaya alaab maalin walbeedka.

- Ma jari kartaa tufaaxa si aad u sameysid lix go' oo isle'eg?
- Qayb intee le'eg ayaa galaaska biyo ku jiraan?
- Sidee baa gacmaha wejiga saacadu u tusaan wakhtiga rubuc markay dhaafto?
- Ma itusi kartaa kala badh iyo rubuc markaad jareyso liinta?
- Haddii aad shukumaanka saddex jeer u laabto si isle'eg, jajab kee ayey ku tuseysaa?

E manaomia e lou alo avanoa se tele e fausia, talanoa ma tusi ai e uiga i vaega (fractions).

